





Talaalka COVID-19: Waxa ay tahay Inaad Ogaato

Xagee ayaan ka heli karaa talaalka?



Sidee aya ballan u qabsadaa?



 Dhakhtarkaaga caafimaadka	Wac dhakhtarkaaga/adeeg bixiyahaaga ama ballan ka qabso khadka tooska ah
 Rugaha caafimaad ee dadka badan lagu tallaalo	Booqo webseedkeena: vaccinelocator.doh.wa.gov/
 Farmashiyaasha xaafada/deegaanka	Ama wac 1-800-525-0127, kadibna riix #. Caawimaad luuqadeed aya la heli karaa.
 Rugaha caafimaad ee bulshada	Way kala duwan tahay. Waxaad ka maqli kartaa wax ku saabsan rugta caafimaadka qof saaxiibkaaga ah ama xubin ka tirsan bulshada. Weydii sida la iskaga diiwaan geliyo.

Maxaan hore ugu soo qaataa ballanta talaalkayga?

Waxaa lagu weydiin karaa waxyaabaha soo socda, laakiin khasab kuguma ahan inaad siiso:

- aqoonsi
- kaarka caymiska
- lambarka sooshiyaal sekuuritiga (security number)



Uma baahnid inaad ahaato muwaadin Mareykan ah si aad u qaadata talaalka. Kuma waydiin doonaan aqoonsigaaga socdaalka/qaxootinimada.

Xogta shaqsiyeed waxaa loo isticmaali doonaa oo keliya ujeedooyinka caafimaadka dadweynaha.

Waa imisa qiimaha tallaalku?

Waxaad kuhelaysaa talaalka lacag la'aan. Waa inaan lacag lagugu soo dallacin ama biil lagu soo dirin.



Miyaan u baahanahay qiyaas labaad ee talaalka?



Tallaalada qaar waxay leeyihiin labo qiyaasood/qaadasho. Waxay qaadataa qiyaastii laba toddobaad ka dib markii si buuxda lagu tallaalo si aad u hesho difaaca ugu fiican. Dadka qaar waxay u baahan karaan kuuro xoojin ah.

Pfizer-BioNTech	2 qaadasho/kuurood, 21 maalmood u dhaxeeya
Moderna	2 qaadasho/kuurood, 28 maalmood u dhaxeeya
Johnson & Johnson	1 qaadasho/kuuro



Wixii macluumaad dheeraad ah
Booqo: COVIDVaccineWA.org ama DOH.WA.GOV/Coronavirus



Wac: 1-800-525-0127, kadibna riix #. Caawimaad luuqadeed aya la heli karaa.

Vaccinate
WA

CovidVaccineWA.org

Maxay yihiin waxyeelooyinka gaarka ah ee tallaalka?

Waxay u badan tahay inaad yeelato waxyeelooyin gaar ah.

Jirkaaga oo dhan:

- Daal
- Madax xanuun
- Murqo xanuuno
- Qarqaryo
- Qandho
- Lalabo



Gacanta cirbada lagaaga duray:

- Xanuun
- Murxid
- Barar



Tallaalada laba qiyaasood leh, waxyeelooyinka gaarka ah ayaa ka sii dari kara marka la qaato qiyaasta labaad ee tallaalka.

Wac 911 haddii aad qabto fal celin xasaasiyadeed. Waxaad iska diiwaangelin kartaa V-safe si aad uga soo warbixiso wixii waxyeelooyin ah: vsafe.cdc.gov.

Muxuu tallaalka COVID-19 qabtaa?



Tallaalka COVID-19 wuxuu jidhkaaga u tababaraa inuu sameeysto difaac kaas oo jirkaaga ka ilaalinaya jirooyinka/xanuunada.

Talaalladu ma yihiin kuwo ammaan ah

Haa. Dhammaan tallaallada waxaa lagu tijaabiyey **tobanaan kun oo qof**.

Waxaa lagu arkay inay amaan u yihiin dadka jinsiyadaha kala duwan leh iyo kuwa qaba xaalado caafimaad sida cayilka, sonkoroowga, cudurka wadnaha, cudurka beerka, iyo HIV.



Department of Health (Waaxda Caafimaadka) waxay si joogto ah u hubisaa warbixinnada badbaadada si loo hubiyo inaysan jirin wax welwel ah oo xagga badbaadada tallaalka ah.

Tallaalada ma kala fiican yihiin?

Waxaan ku talineynaa tallaalka mRNA ee COVID-19 (Pfizer-BioNTech ama Moderna) badelki tallaalka hal qaadashada ah ee Johnson & Johnson (J&J).

Tallaalka J&J ayaad weli la heli kartaa haddii aad rabto inaad qaadato. Kala hadal daryeel bixiye caafimaad wixii ku saabsan xulashooyinkaaga.



Maxay tahay sababta aan u qaadano tallaalka?

Qaadashada tallaalku waxay kaa caawin doontaa inaad nabadgelyo ku joogto shaqada iyo inaad saaxiibbadaa iyo qoyskagaba mar kale wada caweysaan.

Waxaa aad u yaraanaysa suurtagalnimada ah naad si daran u bukooto, isbitaal lagu dhigo, ama aad u dhimato COVID-19.

